



### Maxay tahay ujeedada Laga Leeyahay Daraasadda?

Metro Transit, oo wada shaqeyn la leh Degmada Hennepin iyo Magaalada Minneapolis, ayaa abuuray daraasadda gaadiidka si wax looga ogaado sida ay suurtoagal u tahay horumarinta gaadiidka ee Galbeedka Broadway. Daraasadda gaadiidka ee Galbeedka Broadway waxaa la sameeyey iyada oo ay iska kaashadeen habka qorsheynta ee lagu ogaanayo isla markaana qiimeyn loogu sameynayo horumrinta gaadiidka ee wadada ku dhereran Washington Ave ilaa Galbeedka Broadway ee Waqooyiga Minneapolis iyo Robinsdale, oo ay ka mid yihiin qiimeynta lagu sameeyo jidka suurogalka ee la doonayo inuu isku xiro khadka Buluugga ah ee METRO (Bottineau LRT). Daraasaddu waxa ay qiimeyn ku sameyneysaa khadka hirgelinta ee mustaqbalka (TOD). Natiijada la filayo in laga gaaro waa talo soo jeedin ku saabsan Siyaabaha Ay Doorbidayaan Dadka Degaanka (LPA) ee horumarinta khadka gaadiidka dadweynaha. Hababka kala duwan ee la qiimeynayo waxaa ka mid ah wadooyinka gaadiidku maro iyo xoojinta basaska oo ku jiro khadka basaska ee dheereeya (BRT).

### Waa imisa kharashka ku baxaya horumarinta gaadiidka?

Qarashka ku baxaya dhulka uu marayao BRT waxaa lagu qiyaasay \$40 milyan Qarashka ku baxaya wadooyinka gaadiidku maro waxaa lagu qiyaasay \$229 milyan

### Sidee ayey saameyn ugu yeelanaysaa dadka raaca gaadiidka?

Gaadiidka dadweynaha ee la filayo waxaa raacaya 3,900 ilaa 5000 oo qof maalin kasta sanadka 2040.

### Waa maxay horumarinta suurtoogalka ah ee lagu sameyn karo khadka?

Iyada oo ku xiran nooca gaadiidka ee la doorto, waxaa suurogal in khadka uu soo kordhiyo horumar gaarsiisan inta u dhaxeysa \$220M-\$640M.

### Yaa gacan ka geystay daraasaddan iyo natiijada ka soo baxday?

Sadex guddi oo ka soo jeeda in ka badan 10 goobo ganacsi iyo ururo dano ka leh khadka tareenku maro, xybno ka tirsan maamulka Degmada Hennepin iyo Magaalada Minneapolis, Robinsdale, iyo Golden Valley, madaxda gobolka, iyo Metropolitan Council ayaa dhamaantood ka qeyb qaatay heerer kala duwan si toos ahna uga dhiibtay ra'yigooda. Waxaa intaa dheer, dadaal dheeraad oo la sameeyey oo looga qeyb gelinayo bulshada ayaa fariin lagu gaarsiiyey 500 qof oo deggan khadka gaadiidku maro ayaa ka dhiibtay ra'yigooda.

### Iminka wixii ka dambeeya ...

Wajiga xiga ee wargelinta dadweynaha waa soo ururinta ra'yiga dadaweynaha si loola socodsiiyo madaxda natiijada ka soo baxda daraasadda gaadiidka iyaguna ay taladooda ka dhiibtaan.

**Waxyaabaha lagu talaabsadsy 2015**

- Maajo**
  - Ra'yi dadweynaha ee ku jeeda horumarinta gaadiidka ee Galbeedka Broadway
- Juun**
  - doorashada ilaa sadex kala doorasho oo lagu smeynayo daraasad si faahfaahsan
- Luulyo-Agoosto**
  - Daraasad xagga farsamada ah
- Siteembar**
  - La wadaagga dadweynaha natiijadada daraasadda xagga farsamada ah.
- Oktoobar**
  - Qiimeynta doiorashooyinka
- Nofeembar**
  - Ururinta ra'yiga dadweynaha ee ku saabsan siyaabaha ay door bidayaan
- Diseembar**
  - Doorshada midda ay degaanku door bidayaan iyo dhameystirka daraasadda




*Dadaalka bulshada lagaga qeyb gelinayo waxa uu bilowday bishii Juun 2015 waana sii soconayaa ilaa Diseembar 2015. Dadaalka waxaa ka mid ah in goobaha basasku istaagaan laga hirgeliyo goobo kala duwan ee khadka (kore), suuqa beeraleyda (farmer's markets), wadada Lowry, Habeenka dibad baxa ee heer qaran (National Night Out (below), iyo kuwo kale.*



# West Broadway Study Area

Waxaa la dhameystiray Oktoobar 2015



Macluumaad dheeraad ah kala soco:  
[WestBroadway@metrotransit.org](mailto:WestBroadway@metrotransit.org)

